Taariikhda Kulanka ajandaha lambarkiisu yahay 10c_order: Febraayo 14, 2023

# AMARKA 2023-03

## AMAR KASOO BAXAY GUDIGA DEKADA SEATTLE

Si loo abuuro barnaamijka adeegga tagaasida kirada ah ee la dalbado/qiimaha go'an ku shaqeeya oo ka shaqayn doona Gegiga Caalamiga ah ee Seattle-Tacoma, muddoo shan sano ah.

**WAXAA LASOO JEEDIYAY**
**FEBRAAYO 14, 2023**

## HORDHAC

Kadib barnaamijka sadexda sano ah ee tijaabada ahaa, Gudiga Dekada Seattle ayaa sameeyay kormeerka adag iyo xog uruurinta saamileeyda ee darawallada barnaamijka biloowga ah ee tagaasiga/lacagta go'an lagu kiraysto. Amarka Soo socda ayaa cadaynaaya qaybaha barnaamijka soo socda, ayna ku jiraan qaybo cusub sida waxbarasho iyo wacyi gelin lagu samaynaayo dookha oonlaynka ah; waxay xoojinayaa tababarka iyo ku dhaqanka fulinta adeegga macaamiisha ee wadada geeskeeda; iyo ka faa'iideysiga barnaamihyada tababarka iyo hormarinta darawalka.

## QORAALKA AMARKA

Gudiga Dekada ayaa halkaan ka amraaya Agaasimaha Fulinta inuu abuuro barnaamijka tagsiga ee la dalbado/adeegga qiimaha go'an lagu kiraysto oo ka shaqeeya Gegiga Caalamiga ah ee Seattle-Tacoma si loogu daro qaybaha soo socda:

- Dekada ayaa heshiis cusub oo shaqo mulkiileyaasha tagaasida kaasoo la xariira Barnaamijka Biloowga ah ee Tagsiga la Dalbado/Qiimaha go'an lagu kiraysto; mulkiileyaasha tagaasida ayaa sii shaqayn doona Maarso 1, 2028.
- Wareejinta heshiisyada shaqada ayaa keliya loo ogolaan doonaa sababo sharci ah, ayadoo shaqaalaha diyaaraduhu ay tilmaan ka siin doonaan darawallada sida ujeedooyiinka noocaas ah lagu qeexaayo.
- Dekada ayaa uruurin doonta qarashka isku dhafan, ee safar kasta oo dhan $6/safar kasta ayadoo lacagta toos uu u bixinaayo darawalku uuna siinaayo SEA.
- Dekada ayaa u adeegsan doonta nidaamka faylka ee oonlaynka ah darawallada ayadoo adeegsanaysa wacyi geli, waxbarasho, iyo talo bixin ay ka qaadanayso bulshada darawaliinta, ayadoo la gaaraayo fahan ku aadan in dhaqan gelinta hanaan kasta oo fayl gelida oonlaynka ah uu u baahan yahay talaabada Gudiga.
- Dekada ayaa la xariiri doonta dhiibina doonta arashka maamulka.
- Dekada ayaa sii wadi doonta wacyi gelinta saamileeyda ee afarta jeer sanadkii.
- Dekada ayaa sii wadi doonta inay aqoonsato Ururka Mutadawacnimada Darawallada oo lagu ogolaaday Xeerka 2019-03 si loo fududeeyo fikir diibashada darawalka ee ku aadan barnaamijka tagsiga/kirada qiimaha go'an waxay sii wadi doonaan si joogto ah ula kulmaan Ururka Mutadawiciinta Darawalka. Dekada ayaa qiimayn doonta hormarina doonta barnaamijka tababarka darawalka iyo hormarinta shaqaalaha oo loo fidinaayo darawallada xiiseynaysa.

- Gudiga Adeegyada Gegiga ee Gudiga Dekada, ama wakiiladooda, ayaa dib u eegi doona nidaamka xalinta khilaafka gaadiidka dhulka ee gegeiga si hormarin loogu sameeyo darawallada iyo Ururka Mutadawiciinta Darawalka, looguna soo sheego natiijooyinka Gudiga ugu danbayn Aqoosto 30, 2023. Gudiga, ama wakiilkiisa, ayaa sidoo kale qiimayn doona isbadellada suuqgaynta ee barnaamijka tagsiga/qiimaha go'an lagu kiraysto, ama wakiilkiisa.
- Dekada ayaa sidoo kale dib u eegaysa siina xoojin doonta heerarka adeegga macaamiisha ee qandaraaska ee maamulaha geeska wadada si loo xaqiijiyo u dhaqanka Gudigana xog looga siiyo ku dhaqanka muddo lix bilood ah gudahood kadib marka la ansixiyo Amarkaan.

Sida ku cad waraaqda kasoo baxday Maamulka Dekada Seattle kuna socotay Dawlada Hoose ee Degmada King taasoo ku boorinaysay dhaqan gelinta qarashka go'an ee ugu yar ee lacagta tagsiga/safar kasta oo looga yimaado SEA, Agaasimaha Fulinta ayaa u sheegi doona Gudiga 90 maalmood gudahood marka la dhaqan gasho Amarkaan xaalada isbadellada lasoo jeedshay ee Degmada King ku samaysay safarada tagsiga/qiimaha go'an ee kirada tagaasida ee Degmada King oo dhan. Haddii Degmada King aysan soo saarin xeerka qiimaha ugu yar ee degmada oo dhan ee tagaasida dhammaadka 2023, Gudiga ayaa ka baaraan degi doona qiimaha ugu yar ee tagsi raaca kaasoo keliya quseeya darawallada tagsiga/gaadiidka qiimaha go'an lagu raaco ee loo ogol yahay inay qaadaan rakaabka dalbada ee jooga SEA.

## Bayaan Taageeraaya Amarka

Sida uu Gudigu u sheegay Agaasimaha Fulinta iyo shaqaalaha, dhaqan gelinta barnaamijka tagsiga/gaadiidka qiimaha go'an lagu kireysto waxaa ku jira wada hadal joogto ah, adag, oo daacadnimo ku dhisan lalana yeesho wadeyaasha, darawallada, iyo mulkiileyaasha gaadiidka si loo aqoonsado loona yareeyo ciladaha iyo tabashooyinka marka ay soo baxaan. Barnaamijka tagsiga/gaadiidka qiimaha go'an lagu kireysto waxaa hadda ku jira hanaan nidaamsan oo fududeynaaya wada hadalka joogtada ah ee furan oo lala sameeyo darawallada, wadeyaasha, iyo wakiillada ayadoo loo maraayo Ururka Mutadawacnimada Darawalka, iyo sidoo kale doorka Dekada oo ah kormeerka qandaraaslaha kormeerka maamulka geeska wadada iyo xalinta khilaafaadka.

Dhaqan gelinta barnaamijka waxaa ku jiri doona wada shaqayn ay Dekadu la samayso darawallada iyo wadeyaasha si loo aqoonsado barnaamijka hormarinta shaqaalaha oo waxtar u leh darawallada, ayna ku jiraan barnaamijyada u baahan ruqsada darawallada ganacsiga (CDL) iyo tubaha gaadiidka kale ee dhulka, gaadiidka xamuulka, ama ganacsiga kale ee mushaarka qoyska iyo shaqooyinka xirfadaha gaadiidka.

Waxaa ku jira dhaqan gelinta dib u eegis ay dekadu ku samaynayso shuruudaha heshiiska degmadu la gashay adeegyada maamulka geeska wadada, shuruudaha hadda ee tababarka xalinta khilaafka shaqaalaha maamulka geeska wadada, iyo qiimaynta shuruudaha tababarka ee heshiisyada mustaqbalka si loo xaqiijiyo adeegyada tababarka iyo maamulka geeska wadada.